

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Baarlamaanka Federaalka ah

Golaha Aqalka Sare



جمهورية الصومال الفيدرالية

البرلمان الفيدرالي

مجلس الشيوخ

Federal Republic of Somalia

Federal Parliament

The Upper House

Nuqulka Rasmiga Ah ee Hadal Qoraalka Gaaban ee Golaha Aqalka Sare ee BFS

Si waafaqsan Qod.39aad ee Xeer hoosaadka Golaha Aqalka Sare .

Baarlamaanka 11 ^{aad}	
Kalfadhiga: 8 ^{aad}	Kulankiisa: 6 ^{aad}
Taariikhda: 12/09/2026	Goobta fadhiga: Xarunta Aqalka Sare
Saacadda uu Furmay: 11:23 AM	Saacadda uu Xirmay: 12:02 PM
Shir Guddoonka Fadhiga: Senator Cabdi Xaashi Cabdullahi, Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare.	Guntanka Kulanka: 32 Senator
Martida Kulanka: - Wasiirka Batroolka iyo Macdanta XFS Mudane, Daahir Shire - Wasiir ku-xigeenka Wasaaradda Maaliyadda Mudane, Cabdiqafaar Cilmi Xaange.	Ajendayaasha Kulanka: - Akhrinta Aayadaha Qur'aanka. - Ansixinta Ajendaha. - Akhrinta 3aad ee Hindise Sharciyeedka Macdanta JFS. - Akhrinta 3aad ee Hindise Sharciyeedka Waxka baddelka Qaybta 6aad ee Sharciga Iibka Qaranka. - Akhrinta 1aad ee Hindise xeerreedka Dhismaha Hay'adda Dakhliga.

Furitaanka Kulanka:

Senator Xasan Xuseen Xaaji ayaa akhriyey Aayadaha Qur'aanka ee Kulanka lagu furay.

Ansixinta Ajandayaasha Kulanka:

Guddoomiyaha Golaha Senator Cabdi Xaashi Cabdullahi ayaa xubnaha kulanka fadhiyey ka codsaday in ay ansixiyaan Ajandayaasha kulanka, codayntii ayaana u dhacday sidaan:

Oggol: 31 Senator

Aamusnaansho: Majirin

Diidmo: Majirin

Nuxurka Kulanka:

Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare ayaa u yeeray Guddoomiyaha Guddiga Kheyraadka Qaranka, Kaabayaasha Dhaqaalaha iyo Gaadiidka, Senator Saynab Ismaciil Maxamed si ay Golaha uga hor akhriso warbixinta Akhrinta 3aad ee Hindise Sharciyeedka Macdanta JFS. Warbixinta kaddib, Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare ayaa cod geliyey Ansixinta Hindise Sharciyeedka Macdanta JFS waxay u dhacday sidan:

Oggol: 28 Senator

Aamusnaansho: Majirin

Diidmo: 2 Senator

Intaas kaddib, Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare ayaa u yeeray Guddoomiyaha Guddiga Dhaqaalaha, Maaliyadda, Ganacsiga, Warshadaha, Isgaarsiinta iyo Dalxiiska, Senator Cabdi Axmed Dhuxulow si uu Golaha uga hor akhriyo warbixinta Akhrinta 3aad ee Hindise Sharciyeedka Waxka baddelka Qaybta 6aad ee Sharciga Iibka Qaranka. Warbixinta kaddib, Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare ayaa cod geliyey Ansixinta Hindise Sharciyeedka Waxka baddelka Qaybta 6aad ee Sharciga Iibka Qaranka, waxay u dhacday sidan:

Oggol: 29 Senator

Aamusnaansho: Majirin

Diidmo: 1 Senator

Ansixinta kaddib, Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare ayaa u yeeray Wasiir ku-xigeenka Wasaaradda Maaliyadda Mudane Cabdiqafaar Cilmi Xaange, si uu Golaha uga hor akhriyo Akhrinta 1aad ee Hindise Xeereedka Dhismaha Hay'adda Dakhliga.

Go'aamada kulanka:

1. Ansixinta Ajandayaasha kulanka.
2. Ansixinta Hindise Sharciyeedka Macdanta JFS.
3. Ansixinta Hindise Sharciyeedka Waxka baddelka Qaybta 6aad ee Sharciga Iibka Qaranka.
4. Guddoomiyaha Aqalka Sare ayaa faray maamulka Golaha in Hindise Xeereedka Dhismaha Hay'adda Dakhliga loo gudbiyo Guddiga ku shaqada leh si ay uga gutaan waajibkooda ugana soo diyaariyaan warbixinta akhrinta 2aad.

Ugu dambayntii Guddoomiyaha Golaha Senator Cabdi Xaashi Cabdullaahi ayaa kulanka soo xiray saacadu markay ahayd **12:02 PM.**

=DHAMMAAD=